

Samayso baaswoodh xoogan

Waxa aad u baahan tahay magaca lagu isticmaalo iyo baaswoodh si aad ugu gasho websaytyo badan. Markasta isticmaal baaswoodh xoogan.

Sidee ayuu u eeg yahay baaswoodhka xoogani?

Baaswoodhka xoogan:

- waxaa adag inay dadka kale ku nasiibiyaan
- waxa uu ka kooban yahay 8 xaraf ama wax ka badan
- isticmaalaa xarfado, lambarto, iyo calaamado (!@#\$%&*)
- waxa uu ka duwan yahay baaswoodhdaada kale

Ha **isticmaalin** baaswoodh si yar oo fudud loogu nasiibin karo. Ha **isticmaalin**:

- kalmadaha iyo weedhaha caamka ah
- lambarada xidhiidhka ah (123)
- macluumaadka shakhsi ahaaneed

Sidee ayaan u ilaalinayaan baaswoodhkayga?

- Markasta isticmaal baaswoodhda kale duwan (cidna wada geli kari mayso dhamaan xisaabaadkaaga marka ay ogaato hal baaswoodh).
- Cidna ha u sheegin baaswoodhkaaga.
- Haku kaydsan baaswoodhkaaga meel ay dadka kale arki karaan.
- Markasta ka bax oo xidh daaqada hadii aad cid kale la wadaagto kombuyuuyarka ama aad isticmaasho kombuyuutarada meelahaas.

Sidee ayaan u samaysan karaa baaswoodh xoogan?

Sameeya baaswoodhka ayaa kaa caawin kara inaad samaysato baaswoodh xoogan. Raac 5 talaabo ee samaysashada baaswoodh xoogan oo aad leedahay.

- 1. Waxa aad ka fikirtaa layn ama odhaah hees aad jeceshahay.**
(Buugu waa hadyad aad markasta kolba furi karto)
- 2. Isticmaal xarafka kowaad ee kalmad kasta (abiagycoaaa)**
- 3. Qaar waxa aad ka dhigtaa far waawayn (Abiagycoaaa)**
- 4. Waxa aad u bedehsaa xarafaha qaar calaamado. Waxa aad ku bedeli kartaa xarfadhan calaamado sida. Tusaale ahaan, isticmaal \$ halkaad ka isticmaali lahayn "s" ama u isticmaal @ "a". (Abi@gycoa@A)**
- 5. Ku dar lambar (Abi@gycoa@A5)**

Sidee ayaan u xasuusanayaa baaswoodhkayga?

Waxa aad isticmaali kartaa maamulaha baaswoodhka si aad u xasuusato oo aad u ilaashato baaswoodhkaaga. Lastpass ayaa ah tusaale maamulaha baaswoodhka ah. Yaanu borawsarku kaydin baaswoodhkaaga. Dadka kale ayaa furi kara xisaabtaada hadii ay heli karaa taleefankaaga ama kombuyuutarkaaga.

Daawo si aad macluumaad badan uga hesho:

Ingiriisi- <https://www.digitallearn.org/courses/accounts-passwords-new>

Isbaanish- <https://www.digitallearn.org/courses/cuentas-y-contrasenas-nuevo>